Casharka 38

1. Markii reer binu Israa'iil ay biyo waayeen, miyey rumaysteen in Ilaah biyo siinayo?
-Maya.

2. Maxay reer binu Israa'iil sameeyeen markii ay biyo waayeen?
-Ilaah bay weyddiisteen inuu biyo siiyo.

3. Maxaa Ilaah ku amray Muuse inuu sameeyo si biyo lagu helo?
-Ilaah wuxuu Muuse ku amray inuu dhagaxa la hadlo.

4. Maaddaama Muuse iyo Haaruun aanay la hadlin dhagaa, oo ay dhagaxii usha ku dhuftreen, miyaa Ilaah taas u ciqaabay?
-Haa.

5. Sidee baa Ilaah u ciqaabay Muuse iyo Haaruun?
-Ilaahw uxuu Muuse iyo Haaruun u sheegayinaanay geli doonin dhulkii Kancaan.

6. Maaddaama reer bimu Israa'iil ay weli ashtakoonayaan, maxaa Ilaah ku sameeyey iyaga?
-Ilaah wuxuu ku soo diray masas micyo leh.

7. Sidee baa dembiga loola simi karaa masaska?
-Ilsla sida masasku ay u qaniinayeen oo ay u dilayeen reer binu Israa'iil, ayaa dembiguna dadka u daanneeyaa, oo weliba u dilaa dadka.

8. Maxa Ilaah Muuse u sheegay inuu sameeyo si reer binu Israa'iil lagu badbaadiyo?
-In uu mas ka sameeyo naxaasta, dabadeetana uu ka soo laadlaadiyo tiir.



9. Haddii reer binu Israa'iil ay doonayaan inay ka badbaadaan dhimashada, maxay ahayd inay sameeyaan?
-Waxay ahayd inay maska tiirka ka soo laadlaada egaan.

10. Miyaa reer binu Iraa'iil eegeen maskii ka soo laadlaaday tiirka?
-Haa.

11. Myaa maskii naxaasta ahaa uu lahaa awood uu reer binu Israa'iil ku badbaadiyo?
-Maya.

12. Waa kuma kan keliya ee lahaa awoodda lagu badbaadiyo reer binu Israa'iil?
-Ilaah.

13. Miyaa dembiga reer binu Israa'iil uu dalbanayaa dhimasho?
-Haa.

14. Inkastoo dembiyada reer binu Israa'iil ay mutaysteen dhimasho, muxuu Ilaah u sameeyey kuwii maska naxaasta ah kor u eegay?
-Ilaah wuu badbaadiyey iyaga.

-Maadaama reer binu Israa'iil ayan Ilaah rumaysnayn, ma ayan gelin dhulkii Kancaan.

-Maaddaama reer binu Israa'iila yan Ilaah rumaysnayn, waxay warwareegeen cidlada afartan sannadood ilaa iyaga oo dhan ay dhinteen.

-Maxaa Ilaah u ciqaabayaa reer binu Israa'iil?

-Waayo waxay diideen inay rumaystaan Hadallada Ilaah ee Muuse u keenay.

-Isla sidii Muuse ugu soo dhiibay Hadallada Ilaah reer binu Israa'iil, ayaan aniguna saaxiib kula wadaagayaa Hadallada Ilaahh.

-Haddii haddaba aad la mid tahay reer binu Israaiil oo aad diiddo inaad rumaysato Hadallada Ilaah, Ilaah wuu ku ciqaabayaa, isla sidii uu reer binuIsraa'iil u ciqaabay.

-Markii reer binu Israa'iil ay cidlada wareegayeen afartanka sannadood ayaa dadkii waaweynaa oo dhan ee diiday inay dalka galaan wada baaba'een. Markaasaa Ilaah mar kale reer binuIsraa'iil ku soo celiyey xuduudda laga galo dhulka kancaan.

-Maadaama Muuse Ilaah addeeci waayey qudhiisu, Ilaah wuxuu u diiday in Muuse geeyo dadka dalkii Kancaan.

-Maaddaama Ilaah aanu u oggolaanin Muuse inuu reer binuIsraa'iil geeyo dhulkii Kancaan, ayaa Ilaahw uxuu u doortay reer binu Israa'iil hogaamiye Cusub.

Bal aynu akhrinno Tirintii 27:18-20 & 22-23

18-Markaasaa Rabbigu Muuse ku yidhi, Waxaad soo waddaa Yashuuca ina Nuun oo ah nin Ruuxu ku jiro, oo gacanta dul saar isaga.
19-Oo waxaad isaga soo hor taagtaa wadaadka Elecaasaar ah iyo shirka ood han, oo hortooda amar ku sii.
20-Oo waxaad isaga dul saartaa sharaftaadii, si shirka reer



binu Israa'iil ood hammu ay isaga u addeecaan.
22-Markaasaa Muuse yeelay sidii Rabbigu ku amray, oo wuxuu soo waday Yashuua, kollkaasuu soo hor taagey wadaadki Elecaasaar ahaa iyo shirkii oodhan.
23-Oo gacmuhuu dul saaray, oo amar buu siiyey, siduu Rabbigu Muuse kula hadlay.

-Yuu ahaa hoggaamiyahan cusub ee reer binu Israa'iil ee Ilaah u doortya inuu Muuse beddelo?

-Yashuuca.

-Markii Yashuuca noqday hoggaamiyaha reer binu Israa'iil, Ilaah wuxuu u sheegay Muuse inuu fuulo buur u dhowayd xuduudda dalka Kancaan.

-Buurta dusheeda, Ilaah wuxuu Muuse ka tusay dhulkii reer Kancaan ee uu ka ballanqaaday Ibraahim, Isxaaq, Yacquub iyo farcankiisii.

Bal aynu akhrinno Sharciga-ku-noqoshadiisa 34:1-4

1-Markaasaa Muuse bannaankii Moo'aab ka tegey oo wuxuu aaday Muur Nebo, oo fuulay dhaladii Buur Fisgaah oo Yerixoo ka soo horjedda, kolkaasaa Rabbigu isagii tusay dalkii Gilecaad oodhan iyo tan iyo Daan.
2-Iyo dalkii reer Naftaalli oodhan, iyo dalkii reer Efrayim iyo reer Manaseh, iyo dalkii reer Yahuudah oodhan, tan iyo badda galbeed.
3-Iyo xagga koonfureed, yo bannaanka dooxada Yerixoo oo ah magaalada geedaha timireed, iyo tan iyo Skar.
4-Oo Rabbigu wuxuu isagii ku ydhi, Waa kaas dalkii aan

ugu dhaartay Ibraahim iyo Isxaaq iyo Yacquub oo aan midkood kasta ku idhi, Dalkaas waxaan siinayaa farcankaaga. Haddaba waxaan ka dhigay inaad indhahaaga ku aragto, laakiinse xaggaas u gudbi maysid.

-Maadaama Muuse uu addeeci waayey Ilaah, Ilaah waa u diiday isaga inuu galo dhulkii Kancaan.

-Miyaa haddaba Ilaah balllankiisii dhowray, oo miyaanu Muuse gelin dhulkii Kancaan?

-Maya.

-Ilaah wuxuu mar waliba dhowraa Hadalladiisa.
-Ilaah ma buriyo Hadalladiisa.

-Kaddib markii Ilaah Muuse tusay dhulkii reer Kancaan, isagoo saaran buurta, ayuu Muuse halkaas ku dhintay.

Bal aynu akhrinno Sharciga-Ku-Noqoshadiisa 34:5

5-Sidaas daraaddeed Muuse oo ahaa addoonkii Rabbigu meeshaasoo ahayd dalkii reer Moo'aab ayuu ku dhintay, sida erayga Rabbigu ahaa.

-Kaddib markii Muuse dhintay ayaa Yashuuca la hadlay dadkii.

-Ilaah wuxuu Yashuua u sheegay inuu dadka u diyaar-gareeyo sidii ay ku geli lahaayeen dhulkii Kancaan.

Bal aynu akhrinno Yashuuca 1:1-2



1-Addoonkii Rabbiga oo Muuse ahaa markuu dhintay dabadeed, Rabbigu wuxuu la hadlay Yashuua ina Nuun, oo Muuse midiidin u ahaa, oo wuxuu ku yidhi,

2-Addoonkaygii Muuse ahaa waa dhintay, haddaba kac, oo webigan Urdun ka tallaaba, adiga iyo dadkan oodhamuba, oo waxaad u gudubtaan dalka aan siinayoiyaga, kuwasoo ah reer binu Israa'iil.

-Kaddib markii Muuse dhintay, ayaa Yashuuca wuxuu reer binu Israa'iil ku hoggaamiyey dhulkii Kancaan.

-Miyaa Ilaah dhowray ballankiisii oofiyey oo uu siiyey faracii Ibraahim dhulkii reer Kancaan?

-Haa.

-Isla sida Ilaah ka ballan-qaaday Ibraahim, Isxaaq, iyo Yacquub, Ilaah wuxuu dhulkii reer Kancaan siiyey reer binuIsraa'iil.

-Shayddaanka iyo Fircoon waxay isku dayeen inay reer binu Israa'iil ku sii hayaan addoonsigii reer Masar.

-Balse Ilaah wuuu dhowray ballankiisii ahaa inuu reer binuIsraa'iil siinayo dhulkii reer Kancaan.

-Reer binu Isra'aiil ma ayan rumaysan in Ilaah iyaga cunno iyo biyo uu ka siin karo lama-degaanka.

-Laakiin Ilaah waa dhowray ballankiisii oo haatan wuxuu reer binuIsraa'iil siiyey dhulkii reer Kancaan.

-Ilaah mar waliba wuxuu dhowraa ballankiisa.

-Ilaah welligii ma jebiyo mid ka mid ah ballammadiisa.

Bal aynu akhrinno Yashuuca 11:23a

23-Sidaassuu Yashuuca u wada qabsaday dalkii oodhan, oo wuxuu wada yeelay sidii Rabbigu kula hadlay Muuse; oo Yashuuca wuxuu dalkii dhaxal u siiyey reer binuIsraa'iil, oo wuxuu ugu qaybiyey sidii qabiilooyinkooda ahaayeen,

-Israa'iil imminka waxay degeen dhulkii reer Kancaan.

-Intii Yashuuca noolaa reer binu Israa'iil waxay xusuus-naayeen Ilaah.

Bal aynu akhrinno Xaakinnada 2:7

7-Oo dadkuna Rabbiga u adeegeen wakhtigii Yashuua noolaa oo dhan, iyo wakhtigii odayaashii Yashuuca ka nolol dambeeyey oodhan, kuwaasoo wada arkay kulli shuqulkii weynaa oo Rabbiga u sameeyey reer binuIsraa'iil.

-Wakhti kaddib, Yashuuca wuxuu noqday nin da' ah oo wuu dhintay.

Bal aynu akhrinno Xaakinnada 2:8-9

8-Yashuuca oo ahaa ina Nuun oo addoonkii Rabbiga ahaa wuxuu dhintay isagoo boqol iyo taban sannadood jira.
9-Oo waxay ku aaseen dalkii uud haxalka u helay oo ahaa Timnat Xeres, oo ku tiil dalkii Buuraha lahaa oo reer Efrayim, oo xagga woqooyi ka xigta buurta Gacash.



-Intii Yashuuca noolaa ood han, reer binu Isra'aiil waxay xusuusnaayeen Ilaah.

-Kaddib Yashuuca markii uu dhintay, maxay reer binu Israa'il sameeyeen?

Bal aynu akhrinno Xaakinnada 2:10-13

10-Oo weliba dadkii qarnigaas oodhammu waay ku darmadeen awowayaashood; oow axaa ka daba kacay kuwa qarni kale ah oo aan aqoon Rabbiga, ama shuqulkii uu u sameeyey reer binu Israa'iil.
11-Oo reer binu Israa'iil waxay sameeyeen wax Rabbiga hortiisa ku xun, oo wxay u adeegeen Bacaliimka.
12-Wayna ka tageen Rabbigii ahaa Ilaahii awowayaashodo ooiyaga ka soo bixiyey dalkii Masar, oo waxay raaceen ilaahyo kale, kuwaasoo ahaa ilaahyadii dadkii iyaga ku wareegsanaa, wayna u sujuudeen; oo Rabbigana way ka xanaajiyeen.
13- Oo intay Rabbiga ka tageen ayay u adeegeen Bacal iyo Cashtarot.

-Kaddib markii Yashuua dhintay, reer binuIsraa'iil waxay diideen Ilaah oo waxay noqdeen dad shar ah.

-Kaddib markii Yashuuc auud hintay, reer binuIsraa'iil waxay samaysteen sanamyo oo waxay caabudeen asnaamtii ay Ilaah ahaanta u samaysteen, oo geliyeen booskii Ilaah lahaa.

-Dadkii reer binu Isra'aiil ay la degganaayeen ayaa waxay caabudu jireen sanamkii Bacal iyo Cashtarot.

-Maaddaama reer binu Israa'iil ay diideen Ilaah, waxay iyaga

qudhoodu caabudeen Bacal Cashtorat.

-Haddaba yaa reer binu Israa'iil khiyaameeyey si ay ku diidaan Ilaah oo asnaam u caabudaan?
-Shayddaan.

-Shayddaanka wuxuu khiyaameeyaa dadka, oo dadkana waxay la noqotaa inay Ilaah caabudayaan, iyadoow eliba aanay Ilaah caabudaynin.

-Isla sida Shayddaanku isaga dhigay abeesada si uu u khiyaaneeyo Aadan iyo Xaawo, ayaa Shayddaanku isku dhex qarinayaa sanamka Bacal iyo Cashtarot si dadka uu u khiyaameeyo.

-Shayddaanka wuxuu isku dhex qariyaa ruuxyada iyo jinniyada ay dadkayagu ay taariikh ahaan caabudi jireen.

-Dadka waxay la tahay markii ay caabudayaan ruuxyada iyo jinniyada, inay caabudayaan Ilaah.

-Laakiin Ilaah ma caabudayaan; waxaase ay caabudayaan Shayddaanka.

-Haddii innagu aynu caabudno sheey kale ama waxaan Ilaah ahayn, yaannu caabudaynaa?
-Shayddaan.

-Maxaa Shayddaanka dadka uu ugu hoggaaminayaa inay asnaam caabudaan?

-Waayo Shayddaanka wuxuu neceb yahay Ilaah, oo dooni maayo in qofi Ilaah caabudo.



-Waayo Shayddaanku wuxuu neceb yahay dadka oodhan, oo weliba ma doonayo in Ilaah hal qof badbaadiyo.

-Miyaa Ilaah garanayaa n reer binuIsraa'iil ay caabudayeen sanamkii Bacal iyo Cahstoret?
-Haa.

-Miyaanu Ilaah ugu caroonin reer binuIsraa'iil caabudistii sanamkii Bacal iyo Cahstoret ay caabudayeen?
-Haa.

-Maxaa Ilaah ku sameeyey reer binuIsraa'iil?

Bal aynu akhrinno Xaakinnada 2:14-15

14-Markaasaa cadhadii Rabbigu aad ugu kululaatay reer binu Israa'iil, oow uxuu iyagii ku riday kuwii iyaga dhacay gacmahoodii, oo wuxuu ka iibiyey gacmihii cadaawayaashoodii ku wareegsanaa, sidaas daraaddeed mar dambe ma ay hor istaagi karin cadaawayaashoodii.
15-Oo meel kasta oo ay tageenba gacanta Rabbiga dhib bay u ahayd, sidii Rabbigu ku hadlay, iyo sidii Rabbigu iyaga ugu dhaartay; oo iyana aad bay u dhibaataysnaayeen.

-Maadaama reer binu Israa'iil ay ka tageen caabudista Ilaah, oo ay caabudayaan Bacal iyo Cashtoret, ayaa Ilaah iyaga wuxuu dul-saaray ciqaab kulul.

-Sidee baa Ilaah ugu ciqaabay reer binuIsraa'iil caabudista asnaamta?

-Ilaah wuxuu iyaga u soo diray cadaawayaashoodii si ay u

burburiyaan mirihii ay reer binuIsraa'iil beerteen.

-Ilaah wuxuu cadowgii reer binuIsraa'iil u soo diray si reer binu Israa'iil uga xadaan looda.

-Ilaah wuxuu soo diray cadowgooda si ay reer binu Israa'iil u gumaystaan.

-Markii reer binu Israa'iil ay dembigoodii qirteen, oo Ilaah furasho weyddiisteen, maxaa dhacay?

Bal aynu akhrinno Xaakinnada 2:16

16-Markaasaa Rabbigu wuxuu kiciyey xaakinno iyaga ka badbaadiyey gacantii kuwii dhacayay.

-Markii reer binu Israa'iil ay qirteen dembiyadoodii, oo Ilaah furasho weyddiisteen, Ilaah wuxuu iyaga u dooray rag iyo dumar ka mid ah oo reer binu Israa'iil ka samatabbixiya gardarrada cadaawaha.

-Maxaa raggii iyo dumarkii Ilaah u doortay inay reer binu Israa'iil ka daafacaan gardarrada cadowga loogu yeeri jiray?

-Xaakinnada.

-Waxay haddaba ahaan jirtay marka mid waliba oo Xaakinnada ka mid ah uu nool yahay, in reer binu Israa'iil ay raaci jireen Ilaah.

-Ha yeeshee markii Xaakinnada Ilaah doortay uu dhinto, reer binuIsraa'iil waxay dib ugu noqon jireen caabudistii asnaamta intii ay Ilaah caabudi lahaayeen.



Bal aynu akhrinno Xaakinnada 2:17-19

17-Oo weliba xaakinnadoodiina ma ay dhegaysan, maxaa yeelay, ilaahyo kalay raaceen sidii naag ninkeedii ka dhillowday, wayna u sujuudeen; oo haddiiba gees bay uga leexdeen jidkii ay awowoayaashood mareen iyagoo addeecaya amarradii Rabbiga; laakiinse iyagu sidaa ma aya yeelin.

18-Oo markii Rabbigu iyaga u kiciyey xaakinno ayuu Rabbigu la jiray xaakinkii, oo wakhtigii xaakinkii noolaa ood han wuxuu iyaga ka badbaadiyey gacantii cadaawayaashooda; waayo, Rabbigu wuxuu ka qoomamooday taahiddii ay ka taahayeen kuwii iyaga dulmay oo caddibay.

19-Oo haddana mrkii xaakinkii dhintay ayay dib u noqdeen, oow xay ku kaceen wax ka sii xun wixii awowayaashooa y ku kici jireen, oow axay raaceen ilaahyo kale inay u adeegaan oo ay u sujuudaan, Kama ay joogsan falimahoodii, iyo mdaxadkaantoodii.

-Weliba inkastoo Ilaah u ciqaabay reer binu Israa'iil dembigooda, haddana Ilaah weli wuu jecel yahay oo wuu difaacayaa reer binu Israa'iil.

-Waayo Ilaah wuxuu Ibraahim, Isxaaq, iyo Yacquub u ballan-qaaday inay yeeshaan farac noqon doona quruun weyn.

-Wayo Ilaah wuxuu ballan-qaaday inuu BAdbaadiye ka soo dhex boxo faraca Israa'iil.

-Waayo Ilaahw uxuu kaloo ballan-qaaday inuu farriintiisa, oo ah kitaabka Baybalka uu soo dhex marsiin doono reer Binu Israa'iil.

-Ilaah wuxuu doonayaa in dadka oodhan ay maqlaan farriintiisa si ay ku badbaadaan.

-Xaakinkii ugu dambeeyey reer Binu Israa'iil ee Ilaah doortay waxaa la oran jiray Samuu'eel.

-Samuu'eel wuxuu ahaa xaakinka reer binuIsraa'iil sannado badan.

-Markii Samuu'eel duqoobay, ma jirin mid beddelkiisa geli kara, waayo wiilashiisii kuwa Ilaah rumaysan maahayn.

Bal aynu akhrinno Samuu'eel kii kowaad 8:1-3

1-Oo markii Samuueel gaboobay ayuu wiilashiisii xaakinno uga dhigay reer binuIsraa'iil.
2-Oo wiilkiisii curadka ahaa magiciisuw uxuu ahaa Yooeel, wiilkiisii labaadna magaciisu wuxuu ahaa Abiiyaah; oo waxay xaakinno ka ahaayeen Bi'ir Shebac.
3-Oo wiilashiisiina kuma ay socon jidadkiisii, laakiinse waxay u leexdeen si ay faa'ido u helaan, oointay laaluush qaateen ayay gartii qallooociyeen?

-Maadaama Smuu'eel gaboobay, haddana ma jirin mid isaga beddeli karay, markaasaa reer binu Israa'iil isa soo urursadeen, oo waxay soo booqdeen Samuu'eel.

Bal aynu akhrinno Samuu'eel kii kowaad 8:4-6

4-Markaasaa odayaashii reer binu Israa'iil oodhammu isa soo urursadeen, oo Samuu'eel ugu yimaadeen Raamaah;
5-oo waxay ku yidhaahdeen, Bal eeg, waad gabowday, oo wiilashaaduna kuma socdaan jidadkaagii; haddaba noo yeel boqor na xukuma sida quruumaha kale oo dhan.
6-Laakiinse waxaasu Samuu'eel way la xumaayeen, markii ay ku yidhaahdeen, Na sii boqor na xukuma. Markaasaa



Samuu'eel Rabbiga baryay.

-Ka hor intaanu Samuu'eel dhimanin, maxay reer binuIsraa'iil weyddiisteen Samuueel inuu u sameeyo?

-Reer binu Israa'iil waxay Samuu'eel weyddiisteen inuu doorto boqor hoggaamiya iyaga.

-Maxay haddaba tanu uga caraysiisay Samuueel?

-Samuu'eel aad buu u carooday waayo reer binuIsra'aiil waxay diiddanaayeen Ilaah.

-Waa kuma kan boqortka Israa'iil markii Masar laga soo samatabbixiyey?
-Ilaah.

-Waa kuma boqorka Israa'iil ee hoggaaminayey marka ay cidlada dhex lugaynayeen?
-Ilaah.

-Waa uma boqorka Israa'iil ee hoggaaminayey markii cunnada iyo biyaha loogu keenay lama-degaanka?
-Ilaah.

-Kuma ayuu ahaa boqorka Israa'iil ee hoggaaminayey iyaga markii ay hantiyeen dhulkii reer Kancaan?
-Ilaah.

-Sannado badan, Ilaah wuxuu ahaa boqorka Israa'iil.

-Wakhtiga Ilaah ka soo furtay reer binuIsraa'iil addoonsigii Masar,

Ilaah baa iyaga boqor u ahaa.

-Haatan, reer binuIsra'aiil ma doonayaa in Ilaah ahaado boqorkooda.

-Reer binu Israa'iil waxay doonayaa inay la mid noqdaan dadka iyaga ku wareegsan, oo waxay doonayaan inay yeesheaan nin boqor u ahaada.

-Reer binuIsraa'iil waxay imminka diidayaan in Ilaah iyaga u ahaado Boqor.

-Ilaahna sidan buu ku leeyahay Samuu'eel.

Bal aynu akhrinno Samuu'eel kii kowaad 8:7-8a

7-Oo Rabbiguna wuxuu Samuu'eel ku yidhi, Ball dhegayso codkka dadka iyo kulli waa ay ku leeyihiin oodhan, waayo, adiga kuma ay diidin, laakiinse anay i diideen, inaanan iyaga u ahaan boqor.

8-Siday hore u yeeleen tan iyo maalintii aan ka soo bixiyey Masar iyo ilaa maantadan, taasoo ahayd inay iga tegeen, ooilaahyo kale u adeegeen.

-Maxaa Ilaah haatan ku leeyahay Samuu'eel?

-Ilaah wuxuu ku leeyahay Samuu'eel inaanay reer binu Israa'iil diiaynin Ilaah.

-Ilaah wuxuu u sheegayaa Samuu'eel maaddaama reer binuIsraa'iil ay doonayaan boqor xukuma, ayey isaga ah Ilaah u diiddan yihiin inuu ahaado boqorkooda.



-Miyaa Ilaah reer binuIsraa'iil siiyey boqor?

Bal aynu akhrinno Samuu'eel kii kowaad 11:14-15

14-Markaasaa Samuu'el wuxuu dadkii ku yidhi, Ina keena aynu Gilgaal tagnee oo aynu halkaas boqortooyada ku cusboonaysiinnee.

15-Markaasaa dadkii oodhammu waxay tageen Gigaal, oo Gigaal ayay Saa'uul ku boqreen Rabbiga hortiisa, oow axay halkaas Rabbiga hortiisa ku bixiyeen qurbaanno nabaadiino, oo kolkaasaa Saa'uul iyo dadkii reer binuIsraa'iil oodhammu aad ugu farxeen.

-Inkastoo reer binuIsraa'iil ay diideen in Ilaah iyaga u ahaado boqor, Ilaah wuxuu siiyey boqor kale.

-Magaciisuna wuxuu ahaa Sa'uul.

-Saa'uul wuxuu ahaa kan kowaad ee reer binu Israa'iil u noqday boqor.